



Labo macallin oo dugsiyada sarre sayniska ka dhiga PPS ayaa loo doortay inay iskaashi cilmi-baaris aad loo dayneynayo ay la sameeyaan

Rachel Stagner oo ah macallin ka dhiga kimistariga Dugsiga Sarre ee Madison iyo Amy Sutton oo iyana bayoolajiga ka dhigta Dugsiga Sarre ee Benson ayaan dhawaan waxa ay ka soo noqdeen magaalada San Diego, halkaas oo ay ku soo bandhigeen cilmi-baaris ay u bandhigeen aqoonyahano kale oo dhinaca sayniska ah, kaasi oo qeyb ka ahaa barnaamijka Iskaashiga Sayniska ee Murdock.

"Iskaashigani wuxuu dhiirigalinayaa wada shaqeynta ka dhaxaysa tacliinta sarre iyo macalimiinta wax ka dhigta dugsiyada sarre, taasina waa higsiga lama huraanka ah ee kor u qaadaysa in ardayda daboolka looga qaado cilmi-baarista saynis oo dhabta ah iyo hay'adaha waxbarashada sarre," sidaas waxaa tidhi Stagner. "Waxaan ku rajo weynahay in cilmi-baaristan aan wadnaa noqon doonto mid ku dhiirigalisa ardayda sidii ay raadsan lahaayeen shaqooyinka cilmiga sayniska, ayey haddana tiri."

Stagner iyo Sutton waxaa xilligii xaggaaga ee aan soo dhaafnay doortay barnaamijka sida aadka loo qiimeeyo kaasi oo siiyey fursad ay qabtaan cilmi-baarista ay xiiseynayaan saynisyahanadani ee ay xeel dheerayaashani aqoonta dheer u leeyihiin xirfada shaqadooda. Stagner waxa ay Jaamacada Sayniska iyo Caafimaadka Oregon (OHSU) kala shaqeysaa cilmi-baaris ah, sida loo xakameeyo kaloriiga tijaabooyinka daayerada iyo sida ugu dambeyn loo horumarinayo caafimaadka dadka da'doodu sii weynaaneyso

Cilmi-baarista Sutton waxa ay la xiriirtaa tijaabooyinka lagu sameynayo bakteriyada ciida ku jirta sidii loo baari lahaa haddii laga soo saari karo daawooyin loo isticmaali sidii loogu daaweyn lahaa dadka qabo cudurka kansarka maalin uun. Waxa ay kala shaqeyneysaa cilmi-baaristeedaas Borofoseer Jaamacada Portland wax ka dhiga.

Barnaamijku wuxuu ku dhammaan doonaa muddo ku siman labo sanadood iyada oo macalimiintu la siin doonaa lacag gargaar ah oo dhan \$ 15,000 sidii ay ugu isticmaali lahaayeen cilmi-baarista iyo horumarinta xirfada shaqadooda. Iskaashiga Murdoch waxa ay codsan karaan gargaar lacageed oo dheeraad ah \$ 7,000, lacagtaasi waxa ay ku maaligalin macalimiintu fasaladooda dhammaadka labada sanadood.

Shirkii San Diego Sutton iyo Stagner waxa ay ku soo bandhigeen qoraalo ballaaran oo ay ku sharxayaan cilmi-baaristooda. Sanadka soo socda waxa ay ka soo qeybgalayaasha u soo bandhigi doonaa bandhig dhammaystiran.

"Barnaamijkani wuxuu iga caawinayaa sidii aan iskugu xiri lahaa waayo-aragnimada sayniska ee dhabta ah iyo ardayda. Waxa kale oo ay tiri, tusaalayaashu waxa ay xiriir la yeelan karaan baaritaanka qorsheyn saynis oo wanaagsan iyo wada-hadalada."

Labada macallin ee Stagner iyo Sutton waxa ay rajeynayaa in macalimiinta sayniska ee Dugsiyada Dadweynaha Portland ay codsan doonaan barnaamijkan. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan barnaamikan, waxaad ka fiirisaa [shabakada kafaala qaaday](#), oo ah M.J. Murdock Charitable Trust.

-Pamela Jordan